بسم الله الرحمن الرحيم

# Khaladaadka Tarjamada Soomaaliga
# Ee Kitaabka Quraanka

**Kitaabka Magaciisa:** Quraanka Kariimka iyo Tarjamada Macnihiisa Ee Afka Soomaaliga
**Magaca Qoraaga**: Maxamuud Maxamed Cabdi
**Guddigii Saxay Tarjamada:**

| | |
|---|---|
| 1. Nuuruddiin Cali (as-Salafi) | Guddoomiye. |
| 2. Shariif Cabdi Nuur Xassan | Xubin |
| 3. Cabduraxman Yusuf Aadan | Xubin |
| 4. Maxamuud Maxamed Cabdi | Xubin (qoraaga buugga) |
| 5. Cabduraxman sh. Cumar Axmad Diinle | (faallo iyo dib u sixid) |
| **Taariikhda Kitaabka la qoray:** | 7/11/1405 (1984) |
| **Taariikhda Hordhaca kitaabka la qoray:** | 12/2/1405 Muqdisho |
| **Waxaa ogolaaday in la fidsho:** | Raabidada Caalamka Islaamka. |

## Hordhaca Burrinta (naqdiga) Tarjamadan:

Halkan kuma soo koobi karno qaladaadka ku soo arooray tarjamada afsoomaaliga ee kitaabka Quraanka, hase ahaatee, waxaan doonayaa in aan akhristaha ku baraarujiyo qaar ka mid ah khaladaadkiisa si uu uga digtoonaado. Sabata aanan khaladka kitaabkan khaladaadkiisa ugu soo koobi karin waxaa ugu wayn:

1. Aniga oo aan waqti igu filan u hayn howshan, maxaa yeelay cid kharsh igu siinaysa howshan ma jirto, cilmibaaristuna waxay u baahantahay kharash badan, waxaa ugu yar kharashkaas wixii uu cilmibaaruhu ku noolaan lahaa inta uu howsha ku jiro, aniguna nin xamaasha oo xaaslow ah ayaan ahay, Raabidada Caalamka Islaamkuna kharash igu siinmayso (naqdiga iyo sixidda) tarjamadooda cidkalena haba sheegin, sikastaba ha ahaatee, waxaa waajib diiniya igu ah in aan ku baraarujiyo bulshada soomaaliyeed khaladka ku soo arooray kitaabkan, kaas oo ah mid aad u fool xun, aanna ahayn wax fudud oo indhaha laga dedan karo.

2. Waxaa kale oo aan arkay in khaladaadka badankoodu isku mid yihiin, oo ay soo noqnoqdeen, kolka haddii aan qaar ka mid ah tilmaamno, qaarka kale waa laga taagsan karaa inta kitaabka laga saxayo oo dabcadkale oo saxan ka soo baxayso.

3. Taas waxaa iila jirtay aniga oo aan wax aqoon ah u lahayn dadka kitaabka turjumay, inkasta oo aan soomaaliya wax ku soo bartay oo aan ka soo shaqeeyay wasaaradda waxbarashada muddadii u dhaxaysay 1979kii iyo 1983kii, isla markaana ku tixnaa masaajidyada iyo meelaha tafsiirka laga akhriyo, hadana waxaa layaab igu noqotay magacyada qoraayaasha oo aanan dhammaantood midna ka kasayn! (Mid kaliya ayaan u malaynayaa in uu yahay ninkii joogay Raabidada Muqdishu ee madaxda ka ahaa 1983kii waana ninka qoray tarjamada) Meel ay joogaanna aanan aqoonin si aan ula xiriirana aan garan waayay! Taasina ay igu khasabtay in aan dadwaynaha kitaabkan uga digo, inta aan kala kulmayo dadkii ka mas'uulka ahaa qoriddiisa iyo turjumiddiisa, si aan ugala dodo waxyaabaha qaar aan shaki wayn ka qabo, kolka halkan waxaan ku sheegi doonaa khaladaadka muuqda ee aan dood u baahnayn qaar ka mid ah.

4. Intaa waxaa dheer, inkasta oo kitaabka waahore la turjumay sida ka muuqata taariikhda qoraagu ku dhigay, waxaan wada ognahay in dhawaan la fidshay oo uu soo baxay waqti aan sidaa u sii dheerayn. Sidaa darted, arrinku dabaqabad buu leeyahay hadda, oo waxaa lagama maarmaan ah in khaladkii la saxo bulshadana looga digo si aanay ugu habaabin oo ugu lumin, maxaa yeelay bulshadeennu aad bay u

aqoon gaabantahay mana aha dad cilmiga, siiba diinta islaamka si qoto dheer u dersay, ee cilmigoodu wuxuu u badanyahay baawsi.
Si aan ugu fududeyno akhristaha waxaan u qaybinay gafafka ama khaladka dhowr qaybood oo kala ah:

**A. Khaladka farsamo:**

1. Xarfaha waawayn iyo kuwa yaryar lama kala soocin (**kabitaalka**) ee way firirsanyihiin tusaale ahaan aayadda suuradda al-xajj 37. Sida aan ognahay oo ay guddoonsheen guddigii qortay afsoomaaliga, xarfaha afsoomaaliga waxaa laga soo qaatay Laatiinka, dhawaqa xarfahaasna waxaa laga soo qaatay Carabiga, waxaana taas u sabab ahaa guddiga oo ku murmay iskuna khilaafay in afsoomaaliga lagu qoro xaraf carabi ah iyo in lagu qoro mid laatiin ah.
   Haddaba sida aan ognahay luqadaha lagu qoro xarafka laatiinka waxaa ugu wayn manta ingiriiska, kolka la qorayana waxay leeyihiin xeerar aan marnaba laga boodi karin sida in xarfaha qaar (xaraf wayn lagu qoro (Capital) qaarna kuwo yaryar, tusaale ahaan (Ilaah) ayaa loo qorayaa ee loo qori mayo (ilaah), taas waxaa ka daran in aanuu qoraagu labadaa midna raacayn ee uu mararka qaar iska qoranayo wax kale sida (ILaah)!! (Xarafka I iyo L) labadaba (Capital) ayuu mararka qaar ka dhigayaa!! [Eeg Hordhacca].

2. Qoraagu wuxuu sheegay in uu adeegsaday xarfaha (Z) iyo (TH) asiga oo sheegay in loo baahanyahay xarfo u dhigma (ز) iyo (ث). Waxaan leeyahay looma baahna adeegsiga (Z iyo TH) maxaa yeelay sida uu asiguba sheegay xarfahaasi afsoomaaliga kuma jiraan, taasna macnaheedu waa in aan loo baahnayn, maxaa yeelay afsoomaali ayaan wax u turjumaynaa, xarfahaas waxaa loo baahanyahay oo kaliya haddii la qorayo magacyo sida (yathrib) laakiin qoraagu wuxuu u adeegsanayaa xarfahaas falalka sida (arzuqay iyo arzaaq) meeshii laga rabay in uu adeegsado erayo ah sida (dheef iyo dheefin ama quud iyo quudin) iwm. Maxaa yeelay caamada ayaa adeegsata (arzuqay ama arzaaq) ee ma aha eray cilmibaaris ku habboon. (eeg al-baqarah: 25) iyo hordhaca kitaabka.

3. Taariikhda Kitaabka la qoray iyo taariikhda hordhaca la qoray waxaa horreeya taariikhda hordhaca la qoray, tusaale ahaan wuxuu yiri qoraagu: (waxay dhammaatay qoriddii kitaabkan: 7/11/1405H) macnaha bishii kow iyo tobnaad toddobadeedii oo ah dabayaaqadii sanadkii 1405. Laakiin haddaad eegto halkaa hoosteeda, waxaad arkaysaa in qoraagu ku qoray dhammaadka hordhaca (Muqdisho 12/2/1405)!! Ujeeddadu waa in hordhaca la qoray bishii labaad laba iyo tobankeedii ee sanadkaas, waa sagaal bilood ka hor intaan kitaabka la dhamayn!! Sida la ogyahayna hordhaca waxaa la qoraa kolka kitaabka la qoro kadib, ee lama qoro inta aan kitaabka la qorin. Waa laga yaabaa in qoraayaasha qaar qoraan hordhaca inta aanay kitaabka qorin, laakiin halkan suurta gal maaha, maxaa yeelay, haddii aan sidaa u fasirno arrinkan, taas macnaheedu wuxuu noqonayaa in kitaabka dhan qoriddiisu qaadatay 9 bilood oo kaliya!!

4. Dhibaato kale waxay ka timid in qoraagu ku sheegayo hordhaca in uu (Eebbe u mahad celinayo maxaa yeelay wuxuu fursad u helay in uu ka qaybqaato qoridda kitaabkan)! Isla markaa kitaabku wuxuu ku magacaabanyahay hal qoraa ah, marka meeshaa dhibaato waxay inaga haysataa (kitaabka ma hal nin baa qoray mise dhowr qof?) sida kitaabka qoraalkiisa ka muuqata hal qof ah ayaa qoray, maxaa yeelay hal lahjad ah ayuu ku qoranyahay, haddii aanay qorin dhowr nin oo isku meel ka yimid ama isku reer ah oo isku lahjad ku hadla.

**B. Khaladaadka xagga Luqadda**

1. Labalaabka shibbanayaasha qaar uu ka tegay sida (**Eebbe**) uu u qoray (**Eebe**) ali-cimraan 29.

Khaladka noocan ah khalad wayn ma aha kolka laga hadlo waxyaabaha caadiga ah, laakiin kolka laga hadlayo Quraan ama magaca Eebbe waa khalad khatar ah oo macnaha bedelaya, siiba haddii ay jiraan erayo u eg erayga sida (aabe, eebe iyo eebo iwm). Tan kale, guddigii qoray afsoomaaliga waxay dhaheen afsoomaaligu wuxuu leeyahay xarfo labanlaabma waxayna ku soo koobeen (ma nala garaad baa) waana (m, n, l, g, r, d, iyo b) marka waxaa loo baahnaa in uu xeerkaas ixtiraamo qoraagu.

2. **Luqada Carabiga** ee uu ku qoray hordhaca oo ah luqad aad u (rakiik) ah oo liidata, taasina waxay inatusaysaa aqoon yarida qoraaga ka haysata xagga luqadda carabiga, oo sabab u ah khaladaadka uu galay.

3. Qoraalka afka soomaaliga ah oo (af suuq ah) sida (Een ) oo ah (ee aan) iyo (oy) oo ah (oo ay). Inkasta oo afsoomaaligu af da'yar yahay, waxaa loo baahnaa qoraagu in uu ixtiraamo guddoonkii guddigii afsoomaaliga ee ahaa in loo qoro afsoomaaliga sida ku cad qaamuuska Yaasiin Cismaan uu qoray guddiguna ansaxshay. Qoraagu wuu iska dhegatiray horumarkii lama iloobaanka ahaa ee uu sameeyay qoraalka afsoomaaligu, markaas buu qaab afsuuq ah adeegsaday.

Khaladaadkaas yaryar aad bay u badanyihiin, baal kasta oo aad kitaabka furtana waad ku arkaysaa, laakiin waxaa kuwaa ka sii daran khaladaadka kale ee aan dib ka soo sheegi doonno ee kala ah:

**C. Khaladaadka xagga Manhajka:**

1. Qoraagu wuxuu isku khaldayaa (**Tafsiirka quraanka iyo Tarjamada Macnaha Quraanka**), oo marna isku sheegayo in uu turjumay marna leeyahay waa tafsiir.

2. **Wuxuu yiri Lahjad gaar ah (oo soomaali ah**) kuma qorin! Taasna waxaa beeninaya qoraalkiisa oo aan xataa ka garan karno qolada uu soomaali ka yahay iyo gobalka uu u dhashay. Bal fiiri bogga 7aad, haamishka aayadda 22 ee al-baqara, wuxuu yiri (roob hanqadh iyo hillaac badan..) Soomaalidu waxay dhahdaa (**Roob <u>Onkod</u> iyo Hillaac Badan**, ama Roob **<u>Gugac</u> iyo hillaac badan**) labadaa lahjadood ayaa ugu caansan afsoomaaliga, (**<u>Hanqadh</u>**) meelo gaar ah ayaa laga adeegsadaa, ee ma aha lahjada ay soomaalidu u badantahay, taas ayaana burrinaysa hadalkii turjumaanka ee ahaa in uu raacay (**lahjada loo badanyahay**!!)

3. Lama sheegin guddiga **derejooyinkooda cilmiga** ah iyo waxa ay ku takhasuseen, maadaama ay yihiin dad aan la aqoon oo aan can ahayn waxaa loo baahnaa in ay sheegaan derejooyinkooda cilmiga iyo takhasusaadkooda, ee ma ahayn in ay (**Sheekh**) isku wada magacaabaan, maxaa yeelay sheikh ma aha derejo cilmi ah oo waayahan laysku aqoonsado.

4. **Guddiga ninka u madaxda ah** wuxuu isku magacaabay in uu yahay (**Salafi**) taasina waxay inoo caddaynaysaa ujeeddada ka dambaysa doorashada guddiga taas oo ah (**kooxaysi mid ku dhisan**) aanayna ahayn mid ku dhisan aqoon iyo derejo cilmiyeed iyo mid khibradeed (**professional**).

5. Wuxuu qoraagu ku qoray hordhaca aayadda leh (**إنما المؤمنون إخوة**) ee (10 al-xujuraad), wax munaasabad ah oo ku kalliftayna meesha kama muuqato, sidoo kale wuxuu wadaadku meelo kale oo tarjamada aayadaha qaar ka mid ah ku celcelshay Erayga (**Islaax**) sida (aayadda 200 ee aali cimraan), sidoo kale wuxuu ku fasiray erayga (**ملك**) ee (aayadda 26 ee

aali cimraan) (**Xukun**), waxyaabahaa oo dhan ayaa inoo caddaynaya khalfiyadda qoraaga iyo caqiidadiisa habowsan.

6. Tarjamada (**Magacyada**) sida aan ognahay magacyada lama turjumo kolka wax la turjumayo, siiba magacyada gaarka ah, sida Axmad, iyo Xasan, iyo Mako, iyo Madiino, iyo Jaamicad iyo Mac-had iyo Majmac iwm, ee sidooda ayaa loo sheegaa, qoraagu wuxuu (**Majmac**) ku turjumay (**Wadajir**)!!

7. Waxaa intaa kadaran, in qoraagu asiga oo raacaya manhajka wahhaabiyada uu aayaddii aan la soconkarin manhajkooda ka boodayo haddii uu leexin waayo macnaheeda, tusaale ahaan aayadda 167 ee suuradda al-Baqarah wuu ka booday!! Maxaa yeelay wahhaabiyadu waxay aaminsantahay in gaaladu naarta ka baxayaan, oo naartu dhammaanayso, taas ayaana ugu wacan in ay aayadda ka boodaan, maxaa yeelay aayaddu waxay caddaynaysaa in aanan gaaladu naarta ka baxayn!!. Subxaana laahi!!

8. Waxaa ayaduna taa la jirta in qoraagu kolka uu turjumayo falalka (mudaarica ah) ee la xiriira falalka Ilaahay, uu u turjumayo sidi dhacdooyin soo socda (tusaale ahaan يعلمـه الله wuxuu u turjumayaa – wuu ogaan- (macnaha wuu ogaan doonaa hadda kadib!!) meeshii laga rabay in uu yiraahdo –wuu ogyahay- ama –wuu ogaa- maxaa yeelay falalka iyo cilmiga Ilaahay iyo dhammaan sifooyinkiisu waa azali, mana aha wax mustaqbalka dhici doona, sidaa darted, fal kasta oo (mudaaric ah) oo la xiriira sifooyinka iyo falalka Ilaahay macnihiisu waa (maadi), marka arrinkaas qoraagu qorshaha kuma uusan daran, inkasta oo uu muhiim yahay, maxaa yeelay wuxuu salka ku hayaa caqiido fasahaadsan.

   Marka waa laba middood, in qoraagu uusan garanayn, iyo in uu garanayo laakiin uu manhajka wahhaabiyada u dhuundaloolo, maxaa yeelay wahhaabiyada ayaa aaminsan oo ictiqaadsan in ilaahay dhaqdhaqaaqayo oo meel ka guurayo oo meel kale u guurayo, cilmigiisuna uu sidoo kale yahay oo uu dhacdooyinka ku xiranyahay, waana waxa loo yaqaan (al-bidaa') ee ay shiicada qaar ka mid ah oo fallaago ah aaminsanyihiin, waxay aaminsanyihiin in Ilaahay (cilmigiisu cusboonaanayo oo uu ogaanayo mustaqbalka waxyaabo uusan horey u ogayn) waana mad-hab ka soo horjeedda mad-habta ahlusunnada, oo caqiido fasahaadsan ku salaysan.

**Tusaalayaashaa gaaban kadib, waxaan halkan ugu soo gudbinayaa akhristaha qaar ka mid ah khaladaadkii aan la kulmay intii aan gedgedinayay baalasha kitaabka qaar ka mid ah.**

**Tusaalaha Khaladka Tarjamada:**

| الصواب | الخطأ | الآية | السورة | الرقم |
|---|---|---|---|---|
| - lama turjumin, inta aan hoosta ka hariiqnay aayaddan lama turjumin ee waa laga booday!! Maxaa yeelay wahhaabiyadu waxay aaminsantahay in gaaladu naarta ka baxayaan, oo naartu dhammaanayso, taas ayaana ugu wacan in ay aayadda ka boodaan, maxaa yeelay aayaddu waxay caddaynaysaa in aanan gaaladu naarta ka baxayn!!. Subxaana laahi!! | -? | ... حسرات عليهم وما هم بخارجين من النار | البقرة: ١٦٧<br>وَقَالَ الَّذِينَ اتَّبَعُواْ لَوْ أَنَّ لَنَا كَرَّةً .... | ١ |
| - Waxaad dhahdaa Eebbow adaa ah hantaha nubuwada. | -waxaad dhahdaa Eebow adaa hanta xukunka | .. قل اللهم مالك الملك قال مجاهد: الملك= النبوة، وتؤتي الملك= أي الإسلام والإيمان. | **آل عمران**: ٢٦<br>قُلِ اللَّهُمَّ مَالِكَ الْمُلْكِ تُؤْتِي الْمُلْكَ مَن تَشَاءُ .. | ٢ |
| 1- oo dhexgelisaa maalinta habeenka | Dhexgelisaa maalinta habeenka | ١- و تولج النهار في الليل | الآية: ٢٧ | ٣ |
| 1- ku jira<br>2- wuu ogyahay:<br>wuxuu u adeegsanayaa falka mustaqbalka ah: wahhaabiyada ayaa aaminsan in Eebbe dhaqdhaqaaqayo ama cilmigiisu ku tacaluqo mustaqbalka.. marka halkaa waxaa ka cad in ay Eebbe u nisbaynayaan (Bidaa') البداء<br>sida shiicada.<br><br>3- Eebana wax kasta wuu awoodaa.<br><br>4- wuxuuna ogyahay waxa ku jira samooyinka iyo waxa ku jira dhulka. | 1- Ku sugan<br>2- wuu ogaan<br><br>3- Eebbana wax kasta uu (doono) wuu karaa.<br><br>-wuxuuna ogaan waxa samooyinka ku sugan iyo dhulka | ١- ما في صدوركم<br>٢- يعلمه الله<br><br>٣- والله على كل شيء قدير<br><br>٤- وَيَعْلَمُ مَا فِي السَّمَاوَاتِ وَمَا فِي الأَرْضِ | الآية: ٢٩ | ٤ |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Kuwa rumeeyow<br><br>- Oo xejista | Kuwa (**xaqa**) rumeeyow<br><br>**ورابطوا**<br>Kuna nagaada dhowridda xuduudda **<u>Islaaxa</u>** | ياءيها الذين آمنوا اصبروا وصابروا **<u>ورابطوا</u>** | الآية: ٢٠٠ آل عمران | ٥ |
| - Ma gaarayo<br>- carbiyay<br>- Eebbe | - Ma gaadho<br>- fududeeyay<br>-? | - <u>لن ينال</u> الله<br>- تسخير<br>- الله | الحج: الآية ٣٧ | ٦ |
| Dadka (anfus halkan dad ayaa looga jeedaa.) | Nafta | ولنبلونكم.... (والأنفس) | الآية:١٥٥ البقرة | ٧ |
| Samirka iyo salaadda (maxaa yeelay erayadu waxay wataan (al) tacriif ah marka waa in qodob tacriif ah lagu daro. Sidoo kale wuxuu halkan ku khaldamay (aamanuu) oo uu ku fasiray kuwii (xaqa) rumeeyow sidii caadada u ahayd.<br>Marka halkaa waxaa kaaga cad in uusan kala soocayn Nakirada iyo macrifada | Samir iyo salaad | ياءيها الذين آمنوا..<br>بالصبر والصلاة | الآية: ١٥٣ البقرة | ٨ |
| - At-Tirmizi<br>Halkan qoraagu manhajkiisii buu khilaafay maxaa yeelay wuxuu hordhaca ku sheegay in uu adeegsandoono (Z iyo th) meeshii (ز) hase ahaatee wuxuu adeegsaday (d).<br><br>-Ee aan<br>(een) waa af suuq<br><br>- ma <u>sinna</u><br><br>- (xaataa):<br>afsoomaali ma aha ee waa af suuq carabiga inaga soo galay, waxaana loo qoraa (xataa). Waxaana la | -Waxaa weriyay (Tirmid)<br><br>-Een<br><br>- Ma <u>sina</u><br><br>- <u>Xaataa</u> | الهامش: الملاحظة | ص ٦٦٢<br><br>فصلت: ٣٠-٣٥ | ٩ |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| adeegsadaa (taa daaye).<br>- toosan | - toosana | | | |
| lamaaneeyey<br>(waa khalad daabacadeed)<br><br>Saasi (waa afsuuq)<br>waxaana loo qoraa: (sidaa ama sidaas ama sidaasi) | Lamaaneeyey**ey**<br><br><br><br>saasi | الهامش: الملاحظة | ص ٦٦١<br>فصلت ٢٥-٢٩ | ١٠ |
| hoosteeda | dhexdeeda | من تحتها | المائدة: الآية: ١١٩ | ١١ |

Intaa ayaa tusaale inoogu filan, inta kalena kitaab gaar ah ayaan ku aruurin doonnaa oo ku caddayn doonnaa inshaa allaahu.

Wa billaahi at-towfiiq.

Dr. Hersi Aw Mohamed
Sydney, Australia